



Jamhuuriyada Somaliland  
Dawladda Hoose Ee Hargeisa  
Aggaasimaha Dhulka D/Hoose Hargeisa

Ref/DH/GHDDH/649/2024

Date: 15<sup>th</sup> /10/2024

Ku:Maamulka Geosol  
Og: Xoghayaha Fulinta Dhh  
Og: k/X/ Duqa Caasimada Jsl  
Og: Duqa Caasimada Jsl

=Hargeysa=  
=Hargeysa=  
=Hargeysa=  
=Haregysa=

Ujeedo: tirtirid file

Mudane

Anigo tixraacaya go'anka sumadiisu tahay **go'aan LR:678/2024** kuna taarikhaysan **9<sup>th</sup> october 2024** waxan halkan idiinku soo gudbinaya **tirtirida fiylasha** kala ah **TR:2638, TR:39056, TR:21279**.

Fiylashan oo ay ku kala qoranyihiin magacyada kala ah **Ibraahim Jaamac Cismaan** leh **TR-26387, Axmed Maxamed C/raxmaan** **TR:39056** iyo **Shucayb Maxamed Muuse** **TR:21279**.

Sidaad darteed waxan joo jeedinaya in la tirtiro **fiylashan** iyado loo raacayo **go'aan fulinta** iyo amarka **maxkamda gobolka maroodi jeex**.

Signature

Email: [axmed631@mail.com](mailto:axmed631@mail.com)

Tell: +252-634441845

**Axmed Jaamac Aadan**  
**Aggaasimaha Waaxada Dhulka**



Jamhuuriyada Somaliland  
Dawladda Hoose Hargeysa  
Xafiiska Duqa Caasimadda



Republic of Somaliland  
Municipality of Hargeisa  
Mayor's Office

Go'aan Lr: 678 /2024.

Date: 9<sup>th</sup> October 2024.

Go'aan Guddi Fulineed: -

Shir ay isugu yimaadeen guddida fulinta Caasimada Hargeysa 9<sup>th</sup> October 2024, Shir Guddoomiyena uu ka yahay Duqa Caasimadda Hargeysa Mudane (C/kariim Axmed Mooge), Kuna saabsanayd Tirtirid/Cancelid Faylasha Tr-doodu kala yihiin; Tr: 26387, Tr: 39056 & Tr: 21279, faylashan oo ay Maxkamada Gobolka amartay in la tirtiro, Dood & falan-qayn dheer ka dib: -

Guddida Fulintu: -

Markay Arkeen

Qoddobka 2aad, farqadiisa 1-aad ee Xeerka Maamulka Dhulka iyo Magaalooyinka Xeer Lr: 17/2001, oo tilmaamaya Awooda Maamulka iyo dhul bixinta ee Dawlada Hoose Hargeysa.

Markay Arkeen

Tixraaca warqada sumadeedu tahay Ref: DH/GHDDH/463/2024, kuna taariikhaysan 29<sup>th</sup> June 2024, ujeedadeeduna ahayd jawaab celin iyo soo jeedin Tirtirid faylal, kana soo baxday ku-simaha Aggaasimaha Waaxda Dhulka Dawladda Hoose ee Hargeysa.

Markay Arkeen

Tixraaca warqada sumadeedu tahay MGH/XKS/512/2024, kuna taariikhaysan 29<sup>th</sup> 05 2024, ujeedadeeduna ahayd Tirtirid faylal, kana soo baxday Gudoomiyaha Maxkamada Gobolka Maroodi-Jeex.

Markay Xaqiiqsadeen

In ay haboon tahay in la tirtiro faylalkan maadama ay Maxkamadu soo amartay in la tirtiro.

Markay Tixgeliyeen

Tallada Masuuliyiinta ay hawshani khusayso.

Waxa ay Go'aansadey: -

Ka dib markii ay arkeen dhamaan asbaabaha sare ku xusan, Guddiga fulintu waxa ay Go'aansadey in la tirtiro faylasha Tr: 26387 kuna qoran yahay muwaadinka Magaciisu yahay: Ibraahim Jaamac Cismaan, Tr: 39056 kuna qoran yahay Muwaadinka Magaciisu yahay: Axmed Maxamed C/raxmaan & Tr: 21279 kuna qoran yahay Muwaadinka Magaciisu yahay: Shucayb Maxamed Muuse, iyada oo la fulinayo amarka Maxkamada Gobolka Maroodi Jeex, maadama oo dhulkan ay Dacwadi ka socoto sida ku cad qoraalka Maxkamada Gobolka Maroodi-jeex.

(Siciid Nuur Jaamac).

Xoghayaha Fulinta D/Hoose ee Hargeysa

Mahad

leh.

(Khadar Axmed Cumar (Khadar Nuur'))

Kuxigeenka Duqa Caasimada Hargeysa.

(C/kariim Axmed Mooge).

Duqa Caasimada Hargeysa, ahna Guddi

Golaha Degaanka Caasimada Hargeysa.

Email: MayorOffice2021@somaliland.net, Somaliland.

To: Muna

Cover

10/10/2024 Saan Geosol

SUM:-MGH/XKS/512/2024

TAAR:-29/05/2024



Ouqa Caasimadda Jsl Ahna Gudoomiyaha Golaha Deegaanka Caasimadda =HAR=  
-Xoghayaha Fulinta Dawladda Hoose Ahan Xoghayaha Golaha Deeganka Caasimadda =HAR=

**Ujeeddo:- Tirtirid Iyo Ka Saarid Nidaamka Dawladda Hoose Iyo Adeega GIS-ka Ee Gesol TR-da Hoos Ku Xusan.**

Maxkamadda Gobolka M-Jeex, Hargeysa:-

Iyaada oo tixraacaysa:-

Ku ay dhacdo

Waxaad fulisa

Amarka maxkamadda

29/05/2024

Qoraalka Sumadiisu Tahay MGH/XKS/235/2024 Kuna Taariikhaysan 18/02/2024 Kaasi Oo Maxkamaddu Idinku Waydiisay filaalka leh TR 3aad Ee Kala Ah 26387,39056 iyo 21279 In Laga Saaray Dhulka Xayiran Ee Ku Yaala Degmadda Ibraahim Koodbuur Cabirkiisuna Yahay 80mtrX390mtr Jihooyinkiisuna Kala Yihiin

Waqooyi \_\_\_\_\_ Buurta Sheedaha  
Bari \_\_\_\_\_ Dhulka Xaashi Bacado  
Koonfur \_\_\_\_\_ Ilma Caydiid  
Galbeed \_\_\_\_\_ Aw-Xasan

Iyaada oo tixraacaysa:-

Qoraalka Sumadiisu Tahay XDHH/XXF/441/2024 Kuna Taariikhaysan 30/04/2024 Kana Soo Baxay Xafiiska Xoghayaha Dawladda Hoose Ku Cadeeyay In 3da File Ee Leh TR Sare Ku Xusan Ay Iskugu Jiraan Qaar La Hakiyay Iyo Qaar Dhamaaday.

Markay Aragtay:-

Qoraalka Codsiga Ee Ay Maxkamadda U Soo Qorteen Codsadayaasha Kala Ah: Wakiil C/Raxmaan Xaashi Bacade Iyo Siciid Xaashi Bacade Kuna Taariikhaysan 12/08/2023 Kuna Codasanayaa In Laga Saaro System-Ka Saddex TR Ee Sare Ku Xusan Iyagoo Sheegay In Dhulkaasi Iyaga Loo Xukumay.

Markay Aragtay:-

Amarka Xayiraada Sumadiisu Tahay Tahay MS/DB/776/2016 Kuna Taariikhaysan 22/10/2016.

Markay Aragtay:-

Xukunka Maxkamadda Sare Qaybteeda Dibu Eegista Ee Sumadiisu Tahay MS/DB/776/2016 Kuna Taariikhaysan 17/05/2017.

Sidaasi Darteed Waxay Maxkamaddu Idin Faraysaa In La Tirtiro Faylasha Leh TR Numberadana 26387,39056 Iyo 21279 Lagana Saaro Nimaadka Dawladda Hoose Iyo Kan Faylasha Ee Gesol Maadama Dhulkaasi Gabi Ahaanaba Xayirnaa Sidaa Kalana Loo Xukumay Ilma Xaashi Bacado Sida Ku Cad Xukunka Maxkamadda Sare Qaybteeda Dibu Eegista Ee Sare Ku Xusan.

**{Cabdi Qawdhan Cabdi}**

**Gudoomiyaha Maxkamadda Gobolka M/Jeex=Hargeysa=**